# Barnaamija MFIP ee Waalidiinta da’doodu ka yartahay 18 sano

MFIP for Parents Under Age 18

## Xagee ku noolaan karaa?

Haddii aad ka yartahay 18 sano oo aad rabto MFIP, sharcigu waa in aad la nooshahay:

- Mid ama labad waalidba (degmadu maxay isticmaali kartaa dakhliga waalidkaa si ay u xisaabiso deeqda MFIP).
- Mas’uulkaaga sharciga ah
- Qof weyn oo la caddeyay in uu qaraabo kula yahay ( sida ayeeyo, eedo, adeer)
- Diyaarin meel lagu noolaado oo qof weyn dusha kala socdo.

## Laakiin sharcigani ma soconayo hadii:



- Haddii aadan lahayn waalid, qaraabo kuu dhow, ama qof weli kuu ah, amaba aadan aqoon meeel ay joogaan AMA
- Waxaad ku noolayd meel ka fog waalidkaa, ama mas’uulkaaga ka hor dhalashada ilmahaaga AMA.
- Waxaad ku noolayd meel ka fog waalidkaa ama mas’uulkaaga hal sano ka hor inta aadan codsan MFIP, AMAY
- Waalidkaa, mas’uulkaaga ama qaraabada kuu dhow ay diideen in aad la noolaato AMA
- Addiga ama ilmahaaga ay ku iman karto khatar caafimaadka jirkiisa ama maskaxdiisa ah, ama nabad qabkiisa, haddii aad la noolaato waalidkaa, qaraabadaada, ama mas’uulkaaga. Haddii aad sidaas ku dacwootid; degmadu waxay galkaaga u gudbinaysaa Ilaalinta Caruurta AMA
- Lagama heli karo demada aad ku nooshahay meel lagu noolaaado oo qof weyni uu dusha ka ilaalinayo. Haddii la helo meel diyaar ah, adiga iyo ilmahaaga waa in aaad halkaas ku noolaataan.

Xaaladahaan waxaa loo yaqaan Xaaladdo Gaar ah. Haddii aad buuxiso xaaladahaas gaarka ah oo dhan, degmadu waxay ku weydiisan kartaa in aad ku noolaato meel qof weyn uu dusha ka ilaalinayo, in aad ku noolaato oo lagu caawinayo, laakin taas kuguma samayn karaan.

## Ma tahay in aad dugsi aado?

**Haddii aad ka yartahay 18 sano** oo aadan haysan shahaadada dugsiga sare, ama GED, waxaa laga yaaba in ay tahay in aad aado dugsi si aad u hesho MFIP.

Laakiin, ma **aha in aad** dugsi aado haddii:

- Aadan heli karin gaadiid
- Aadan heli karin xanaannaynta caruurta
- Waad jirrantahay ama waxaad tahay curyaan aad u daran oo aan aadi Karin dugsi
- Guriga ayaa lagaaga baahan yahay, waayo waxaa guriga jooga qof jirran ama curyaan ah.
- Ilamahaaga waxay ka yaryihiin 6 todobaad.
- Ma aha aamin in aad dugsi aado sabab la xiriirta dagaallo iyo rabshado qoys darteed.


**Haddii aad ka yartahay 18 sano,** waa in degmadu kuu samaysaa qorshe waxbarasho. Waa in ay fiiriyaan baahidaada waxbarasho, xirfaddaada, arrimahaaga qoyska, baahida xanaanada ilmaha, iyo taariikhdaada shaqo si qorshe laguugu sameeyo. Waa in aad fulisaa qorshaha waxbarasho, **haddii kale waxa lagu saarayaa "xayiraad"**.

Xayiraad micneheedu waxa weeye, waxaad waayaysaa qayb ka mid ah lacagta MFIP. Waxaad waayeysaa 10% ka mid ah lacagta MFIP bisha kowaad. Ka dib waxaad waayeysaa 30% bisha xigta. Gargaarkaagu wuxuu yaraanayaa 30% bil walba illaa aad xalliso dhibta jirta.

**Waa wax muhiim ah inaad ka baxdo xayiraadda sida ugu dhaqsa badan.** Haddii aad ku jirto xayiraad wax ka badan 6 bilood, waxaad gaaraysaa 100% xayiraad le'eg. Taas micneheedo waxa ay ka dhigan waxay joojinayaan lacagtii MFIP iyo cuntadii gargaarka ahayd.

**Haddii aad jirto 18 ama 19 sano** oo aadan haysan shahaado dugsi sare ama GED, waxaad aadaysaa dugsi ama qorshe shaqaalayn midkood. Fiiri xogta urursan *Qorshaha Shaqaaleynta MFIP*.

## Ma ii bilaababatay tirsigii 5ta sano ee MFIP?



Waxaad heli kartaa MFIP haddii **aad tahay walid** wadar le'eg 60 bilood (5 Sano) oo keliya noloshaada.

**Laakiin haddii aad ka yartahay 20 sano oo aad buuxiso sharcigii ka qayb gelitaanka (xaadirid) dugsiga , waqtgii aad ku jirtay MFIP lagu dari mayo 60ka bilood.**


Waxaa kaloo 60ka bilood aan lagu darayn bil kasta oo lacagta MFIP laguugu soo diray waalidkaa. Ka wac xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ee deegaankaaga 1-(877) 696-6529, oo weydii sida loo siyaadin karo 60ka bilood ee la xadiday.

## Maxaan sameeyaa haddii aanan ogolayn go'aanka MFIP?

Waxaad qaadan kartaa racfaan haddii aadan ogolayn go'aan ay degmadu gaartay. In aad racfaan qaadato, waxaad haysataa 30 maalmood laga bilaabo taariikhda aad ogaysiinta heshay. Ka wac markiiba xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ee deegaankaaga 1-(877) 696-6529.

Waxaad heli kartaa gargaarka oo dhamaystiran inta lagu jiro racfaanka, haddii aad racfaan qaadatay.

- **10 maalmood** gudohood laga bilaabo taariikhda degmadu kuu soo dirtay ogaysiinta **ama**
- Ka hor taariikhda joojinta ama jaridu bilaabato.




Hadii ay jirto "sabab macquul ah" oo di b ugu dhacday, waxaad racfaanka qaadan kartaa 90 maalood kadib ogaysiinta. Waxaa sabab macquul ah noqon kara addiga oo jiranaa ama magaalada ka maqnaa markii ogaysiintu timid.

Waxaa jira 2 siyood oo aad u diri kartid racfaankaaga.

**Si xiriirsan (toos ah):**

Waxaad kari kartaa fill out a form and submit your appeal xiriirsan. Tag: https://mn.gov/dhs/.



→ Guji halka "How do I" sanduuqa dusha sare ee bogga
→ Hoos "Find" guji halka "edocs and forms"
→ Hubi in bogga in aad dooratay bog ku qoran luqadaada
→ Garaac 0033 barta baaritaanka

Waxaa kaloo jira timaan bixin haddii aad rabto in aad akhriso . Si tadaxar leh u akhri foomka, si dhamaystiran u buuxi, kadibna guji "Dir" 'Submit" dhanka midig ee hoose. Waxaa wanaagsan in aad koobi ka daabacatid.

**Boostada ama fakis:**

Waxaad qori kartaa warqad, boostada dhig ama fakis ku dir. Waxaad sheegtaa in aad racfaan ka qaadanaysid go'aan ku saabsan MFIP iyo sababta aad racfaanka uga qaadanaysid. Hubi in aad ku qortay tirsiga gal dacweedkaaga iyo taariikhda warqadaada. La har koobi. Warqadaha ay kuu soo direen waxay leeyihiin cinwaankooda iyo tirsiga fakiskood oo aad u baahantahay.

Xog Dheeraad ah fiiri xogta urursan, *Racfaan U Qaadashada DHS*.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**